



Waxaa imaan doona naf jeclaysi iyo arimo aad diidi doontaan" waxay dheheen: Rasuulka Ilaahayow, maxaad nafariysaa? wuxuu yiri: "iska bixiya xaqa la idinku leeyahay, xaqiinana Ilaahay waydiista

Cabdullaahi Binu Mascuud -Allaha ka raali ahaadee- wuxuu Nabiga scw ka wariyey inuu yiri: "Waxaa imaan doona naf jeclaysi iyo arimo aad diidi doontaan" waxay dheheen: Rasuulka Ilaahayow, maxaad nafariysaa? wuxuu yiri: "iska bixiya xaqa la idinku leeyahay, xaqiinana Ilaahay waydiista."

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate- wuxuu sheegay inay muslimiinta talada u qaban doonaan madax qaadan doona maalka muslimiinta iyo aduunyada kaleba, oo waxay doonaan ku samaynaaya Muslimiintana u diidaya xaqa ay ku leeyihiin. Madaxdaas waxaa laga arki doonaa arimo aad Diinta waafaqsanayn oo la diido. Asaxaabtu waxay waydiiyeen Nabiga scw: waxa ay samaynayaan xaaladaas?. Nabigu -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu sheegay in xoolaha ay qaateen aysan keenayn inaad diidaan xaqii ay waajibka idinku lahaayeen oo ah inaad maqashaan oo adeecdaan, balse ku sabra oo maqala oo adeeca oo ha ku qabsanina xukunka, oo Ilaahay waydiista xaqiina, oo ka barya inuu idiin hagaajiyo oo idinka celiyo sharkooda iyo dulmigooda.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3156>

